



AKADEMISKA  
SJUKHUSET

BB på vägs återbesöksmottagning - Somaliska

# BB på vägs återbesöksmottagning

Information



**If you have questions, please contact:**

BB 96 E:  
BB på väg:

**1177**  
018-611 56 93  
018-611 56 91



Turn the page for  
more information!

Shuruuda guri tegid xilli hore ah waa in hooyada iyo ilmaha ay labaduba caafimaad qabaan, dhakhtarka carruurtuna baaray ilmaha iyo in ilmuhu bilaabay wax cabbitaan.

## **Sii wadid**

Qoysaska taga guriga ugu horreyn lix saacadood ka dib ummulida iyo ilaa iyo inta ilmuhu jirro 72 saacadood waxay helayaan sii wadid ah dhinaca la xidhiidhka isbitaalka hooyada iyo ilmaha.

Maalinta ku xigta ayaa ummuliso ka tirsan isbitaalka hooyada iyo ilmaha ay ku soo wici doontaa si loo ogaado sida xaaladu tahay. Ha iloobin in telafoonku uu daaranyahay! Dhinaca qoysaska deggan gudaha degmada Uppsala iyo Knivsta waxa marka baahi jirto loo soo bandhigayaa booqasho guriga ah.

Dhinaca qoysaska ka tirsan Enköping, Tierp ama Gimo waa ummulisada rugtaada xannaanada hooyada qofka ka shaqaynaysa wixi ku saabsan sii wadida iyo qorshaynta booqashada dib ugu soo noqoshada. Guriga markaad tagtaan maalin fasax ah waxa isbitaalka hooyada iyo ilmuhu xidhiidhka ku samaynayaan dhinaca wada-hadal telafoon ilaa iyo inta ku siman maalinta shaqo ee soo socota.

## **Guri tegitaan ammaan iyo hubaal ah**

Ujeeddadayadu waa in la dareemo ammaan in qofka ah waalid cusub tago guriga kana tago isbitaalka ugu horreyn iyadoo la haysto ogaanshaha ku saabsan in aanu idin la soo xidhiidhayno maalinta ka dambeysa.

Xilliga wada-hadalka telafoon/booqashada guriga waxay ummulisadu la hadlaysaa hooyada dhawaan ummushay si loo ogaado sida tahay, waxa laga jawaabayaa su'aalo iyo bixinta talo ah dhinaca baahideeda. Ummulisadu waxay soo bandhigaysaa xitaa su'aalo ku saabsan ilmaha iyo naas-nuujinta/cuntada si dhinaca baahidiina iyo su'aalaha looga bixiyo warbixin iyo talo ku saabsan daryeelida ilmaha.

## **Jooniska ilmaha dhawaan dhashay**

La socodka carruurta uu ku dhacay jooniska ilmaha dhawaan dhashay waxa badanaaba lagu fulin karaa guriga laakiin haddii loo baahdo baaritaan dhiig waxa muhiim noqon karta in aad timaadaan isbitaalka si loo qaado dhiig iyo la socod.

## **Qaabilaada booqashada dib ugu soo noqoshada**

Carruurta taga guriga 72 saacadood gudahood waxa ay ku soo noqonayaan qaabilaada loogu talagalay:

- Baaritaanka ummulisada ama dhakhtarka carruurta
- Miisaanka
- Baaritaanka dhiiga PKU ee xanuunada aan caadiga ahayn haddii aan mar horreba la qaadin
- Baaritaanka maqalka ee OAE haddii aan mar horreba la fulin

Hooyooyinka haya su'aalo, u baahan caawimaad dhinaca naas-nuujinta ah ama leh dhibaatooyin kale waxa u taala xitaa fursada in wada-hadal lala yeesho ummuliso.

Ummulisada la soo hadlaysa gurigiina ayaa idinku wargelinaysa taariikhda iyo wakhtiga booqashada dib ugu soo noqoshada.

Dadkiina booqashada dib ugu soo noqoshada ka samaynaya Uppsala waxa qaabilaadu ay ku taalaa kadinka 96. Maaha suurtoagal in loo soo kaxaysto carruurta walaalaha ah qaabilaada booqashada dib ugu soo noqoshada maadaama dhismayaashu ay yaryihiin iyo si loo yareeyo khatarta infekshan.

### **Warbixinta bukaan socodka**

Xilliga booqashada qaabilaada dib ugu soo noqoshada ee Uppsala uma baahnidin inaad wargelisaan isxaadiriska bukaan socodka ee kadinka gelitaanka. Toos u tag qaabilaada oo fadhiiso qolka sugitaanka markaasi ayaanu magaciina ku dhawaaqaynaa markay tahahay xilligiina.



### **1177**

You will find information and services for your health on the website 1177.se. For health care advice call 1177, open 24 hours a day.



### **Contact Akademiska**

Akademiska sjukhuset can be contacted via:  
patientkontakt@akademiska.se  
Patientkontakt: 018-611 30 33,  
General number: 018-611 00 00